

Waa maxay Miisaaniyad-wadaagga?

Miisaaniyad-wadaaggu (PB) wuxuu dadka deggan Columbus siinayaa fursad ay si toos ah uga qaybqaataan go'aaminta sida loo isticmaalo lacagaha dadweynaha.

Golaha Deegaanka ee magaaladaadu wuxuu ansixiyey \$9 milyan—oo ah \$1 milyan degmo kasta—si loogu maalgeliyo mashaariicda horumarinta kaabayaasha ee ay bulshadu doorato sannadaha 2026–2027.

Qiyamkayaga iyo Mabaadi'deena



Bulsho



Sinnaan iyo Ka-mid-Ahaansho



Hufnaan,
Daacadnimo iyo
Kalsooni



Awood-siinta



Joogteynta

Wax Badan ka Ogow Miisaaniyad-wadaagga

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo:
common.oneproject.org/columbus

Kooxdeena kala xiriir barta:
ParticipatoryBudgeting@columbus.gov

Is-xilqaan oo noqo Wakiil Miisaaniyadeed

Ergooyinka Miisaaniyaddu waa mutadawiciin ka tirsan bulshada oo qaata fikradaha hordhaca ah ee mashaariicda, kuna beddela mashaariic la hirgelin karo. Waxay si iskaashi ah ula shaqeeyaan shaqaalaha magaalada si ay u qiimeeyaan fikradaha mashaariicda, iyagoo eegaya kharashka, suurtagalnimada hirgelinta, waxtarka iyo baahida loo qabo. Kadibna waxay diyaariyaan soo-jeedinno si wanaagsan loo faahfaahiyey oo bulshada loo soo bandhigo si ay uga fiirsato. Qof kasta oo deggan magaalada oo ka weyn 14 sano wuu is-xilqaami karaa. Fadlan noogu soo dir iimayl cinwaanka kor ku xusan ama buuxi sahanka oo muuji inaad danaynayso is-xilqaamidda, kaddib markaad soo gudbiso fikraddaada.

Hel Degmadaada



Hel degmadaada adigoo iskaan ka qaadaya koodhka QR

THE CITY OF
COLUMBUS
CITY COUNCIL

THE CITY OF
COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR



Codkeena, Miisaaniyadda Aan Dooranno

Barnaamijka Miisaaniyad-wadaagga
Columbus ee 2026

Habraaca Miisaaniyad-wadaagga



1. Ururinta Fikradaha

U soo gudbi fikradaha mashaariicda degmadaada munaasabadaha bulshada ama internetka.

Yaa ka qaybqaadanayo: Dadka deggan Columbus, da' kasta



2. Horumarinta Soo-jeedinta

Wakiillada Miisaaniyaddu waxay la shaqeeyaan waaxyaha magaalada si ay u qiimeeyaan suurtagalnimada hirgelinta fikradaha, una soo xulaan mashaariicda loo gudbinayo codbixinta. **Yaa ka qaybqaadanayo:** Waa inuu qofku yahay 14 sano ama ka weyn, isla markaana uu ku nool yahay, ka shaqeeyo ama wax ka barto degmada.



3. Codaynta

Dadku waxay u codeeyaan mashaariicda ay ku qiimeeyeen in mudnaan la siiyo, iyagoo qof ahaan ama internetka u codeynaya. Codkaa la tiriyaa.

Yaa ka qaybqaadanayo: Waa inuu qofku yahay 16 sano ama ka weyn, ku nool yahay degmada uu ka codaynayo, isla markaana uu isagu caddaado inuu buuxinayo shuruudaha u-qalmitaanka



4. Hirgelinta

Mashaariicda ku guulaysata codbixinta ayaa la hirgelinayaa sannadka 2027, waxaana geeddi-socodka uu dib u bilaabanayaa wareegga 2027–2028, haddii loo qoondeeyo miisaaniyad.

La kulan Jaalayaashaada La-falgalka Bulshada

Degmada 1: Ohio Hispanic Coalition

(Isbahaysiga Dadka Hispanic-ka ah ee Ohio)

Degmada 2: Community Refugee & Immigration Services

(Adeegyada Bulshada ee Qaxootiga iyo Soo-galootiga)

Degmada 3: Elevate Northland

Degmada 4: Mu'asasada Horumarinta Bulsho Daryeel leh

(Community of Caring Development Foundation)

Degmada 5: See Brilliance

Degmada 6: Transit Columbus

Degmada 7: Jiha Cusub u Jihaynta Bulshada (Community for New Direction)

Degmada 8: Iskaashiga Horumarinta South Side (South Side Thrive Collaboration)

Degmada 9: Golaha Akhris-qoraalka Columbus (Columbus Literacy



Waa maxay Mashaariicda Horumarinta Raasmaalka?



Horumarinno jireed oo muddo dheer jira



Maalgelin lagu sameeyo kaabayaasha ama xarumaha dadweynaha



Mashaariic faa'iido u leh bulshada (Dariiqyada lugaynta iyo hareeraha waddooyinka oo cusub, jidad ay wada isticmaalaan dadka lugaynaya iyo baaskiil-wadayaashu, waddooyin, garoomo ciyaareed, kaamirooyin amni, nalal)



Mushaharka shaqaalaha magaalada



Adeegyada magaalada ama kharashaadka hawlgalka (xaaqidda barafka, qaadista qashinka iyo alaabta dib loo warshadayn karo, iyo codsiyada loo diro 311).

Ka qaybqaado geeddi-socodka dimuqraadiyadeed!

"Waxaan aad ugu faraxsanahay Miisaaniyad-wadaagga, maadaama uu yahay hab lagu awood-siiyo codadka bulshooyinka aan si ku filan loogu adeegin. Wuxuu u oggolaanayaa bulshadeenna—oo ay ku jiraan dhallinyaradu—inay si toos ah u qaabeeyaan sida loo isticmaalo lacagaha dadweynaha, taas oo abuuraysa geeddi-socod loo dhan yahay, ka-qaybgal badan leh, isla markaana si wanaagsan uga tarjumaya bulshada."

Gibika Sapkota

Xubin ka tirsan Guddiga Hagidda Ardayda
Columbus Alternative High School

"Bulsho Daryeelka leh (Community of Caring) waxay dooratay inay iskaashi la samayso dadaalka Miisaaniyad-wadaagga ee magaalada, sababtoo ah wuxuu mudnaanta siinayaa codka dadka deggan magaalada si ay uga qaybqaataan qaabaynta maalgelinta si toos ah u saamaynaysa xaafadhooda. Geeddi-socodkani wuxuu waafaqsan yahay himiladeenna ah inaan dhisno bulsho isku xiran oo loo siman yahay, annagoo dadka u awood siinayna inay si wadajir ah u abuuraan xalal, isla markaana horseedaan isbeddel macno leh oo ay bulshadu hoggaaminayso."

Adam K. Troy

Madaxa Fulinta

Mu'asasada Horumarinta Bulsho Daryeel leh
(Community of Caring Development Foundation)